# WARBIXINAHA AMAANAHA IYO CABOOSHINKA

## SIDEED II CAAWIN KARTAA?

Waxaan ku adagnahay sidii aan u hagaajin laheyn hawlaha  aanu qabano laakiin ma awoodi karayno ilaa aad na caawisaan. Waxaan u baahanay inaan idinka maqalno hadii aanad ku faraxsanayn hawshaanu qabano, siaan idiinku sharaxno una saxno wixii khaldan. Hadii aad ka warwarsan tahay hawl gaara, la hadal ama warqad u soo qor shaqaalaha xafiiska ama maamulaha. Hadii dhibaato jirto waxaan isku dayaynaa inaan saxno isla markaaba.

Xaruntayada lanagala xidhiidho,Waltham Forest Direct (020 8496 3000), waan ku farxi lahayn inaan ku caawino noo soo sheeg dacwadaada si aan dacwo sharciya kuugu diyaarino.

## AYAA SAMAYN KARA CABASHO?

Qof kasta oo raba, ama hela, hawlaha aan fulino wuu caban karaa hadii ayna ku faraxsanayn nidaamka aan ula dhaqano. Qof walba oo soo dacwooda loolama dhaqmi doono si kaduwan dadka kale. Waxan ka baraynay cabashooyinkiina casharo muhiima. Cabashooyinkaaga waxay horumarinayaan hawlaha qof walba ee mustaqbalka.

## SIDEE LOO SAMAYN KARAA CABASHO?

Waxaad ku samayn kartaa cashadaada  warqada,telefoon, email, fax ama shaqsi .

Waxa kaloo waliba buuxin kartaa arjiyada cabashooyinka adigoo ku lifaaqaya waraaqdan

Waxa kaloo ku samayn kartaa cabashadaada adigoo buuxinaya koobigayaga  arjiga ee internetka oo ah www.lbwf.gov.uk

## SIDEEN UGA SHAQAYNAA CABASHOOYINKA

Hawl walba waxay leedahay xeer u gaara oo lagu dacwoodo, kama jawaabi karno dacwooyinkoo dhan marka la raacayo sharcigan. Hadii aanu baadhi kari wayno cabashadaa sababtan awgeed, waxan kuu sheegi doonaa kuguna waanin doonaa sida saxda ah ee lagu qaadan karo abiil.

## WARBIXINAHA AMAANAHA IYO CABOOSHINKA

## SIDEE LOO XALINAYAA DOONAA CABASHADAADA

Laga bilaabo1da May 2002, Degmada Waltham Forest hababka cabashooyinka waxay u bedeshay laba dariiqadood. Taasoo macnahoodu yahay waxad heli doontaan jawaab deg deg ah cabashooyinkiina.

### Dariiqada 1

Waxan heli doontaa warqada 5 cisho gudahood markaan helon cabashadaada, taasoo kuu sharaxaysa inaan helnay dacwadaadiii, dacwadaadana laga soo jawaabi doono.

Waxaa jawaab buuxda iyo waxaad ku heli 28 cisho gudahood dabadood maalintaan cabashadaadu na soo gaadhay uuna soo qoaray maamulahayaga. Hadii ay dhacan wax dib u dhiga, waxaa laguu soo sheegi sababta iyadoo qoraaal ah.

### Dariiqada 2

Hadii aanad ku faraxsanany jawaabta kowad, waxaad weydiin kartaa Degmada gudomiyaheeda inuu dib u eego go’aanka ay gaadheen kuwa hawshani khusayso. Degmada qaybteeda dacwooyinka ayaa kuu soo sheegi doono 5 maalmood gudahood markay helaan cabashadaadan waxaa dib loo eegi 28 maalmood gudahood. Mar labaad waxaa lagugula talin waxa habsaamiyay.

## HADII AANAN KU FARAXSANAYN, MA SII WADI KARAA CABASHADAYDA?

### Dawlada Hoose Ombudsman

Waad weydiin kartaa dawlad Dawlada Hoose ombudsman inay dib u eegaan qaraarad degmada qaadeen hadii aadan ku faraxsanayn go’aanka cabashadaada.Jawaabta gudoomiyaha degmada waa lagu dari doonaa warka ku sahabsan inaad xaq u leedahay inaad ku dacwooto ombudsman.

Ombudsman waa qof madax banana kaasoo baadhaya dacwooyinka lagaga soo horjeeda degmada. Baadhitaanka ombudsman waa bilaash iyo qarsoodi.Waad la soo hadli kartaa ombudsman telefoonka 020 7217 4620 ama waxad kula soo xidhiidh kartaa internetka oo ah www.lgo.org.uk. Waxay u badan tahay in ombudsman uu dacwada dib noogu soo celiyo hadii aanay soo marin nidaamkayaga dacwada.

## WAXAN BALAN KU KUUGU QAADAYNAA

Waxan adkaynaynaa inaa ku dhagaysano iyo kuna siino xal maalaha khaladku dku ka dhacay.

**Waxan samaynaynaa:** Jawaab deg deg ah kaa siino dacwadaada
Inaan baadhno dacwadaada si saxa iyo qarsoodi ah
Ku ogaysiino horumarka aan samaynay
Waxan kula xidhiidhinaynaa xildhibaanka xaafada aad ku
nooshahay hadii aad doonayso inay ku caawiyaan